



The Upper House Annual Report 2017

Warbixinta Sanadlaha ah ee
Golaha Aqalka Sare
2017

Tusmada Buugga

1. Golaha Aqalka Sare	4
Arar.....	5
Nidaamka Baarlamaaniga Ah Ee Soomaaliya.....	6
Qaabdhismeedka Dowladda Federaalka Soomaaliya.....	7
Kaalinta Xeer Dejineed:.....	9
Kaalinta Baariseed	9
Kaalinta Metelaadda	9
Habraaca Xeer Dejineed	10
Sidee Hindise-Sharciyeed Sharci Ku Noqdaa?.....	11
Astaanka Golaha Aqalka Sare	12
2. Senatarada.....	13
Xogta Senatarada	14
Sida Loo Soo Doorto Iyo Shuruudaha Xubinimada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya	14
Senatarada Oo Metelaya Shacabka Deegaan Doorashadooda:.....	14
Deegaan Doorashooyinka Xubnaha Aqalka Sare.....	21
3. Waxqabadka Golaha.....	22
Waxqabadka Golaha Aqalka Sare	22
Fadhiga Guud Ee Golaha.....	24
Habraaca Meel Marinta Sharuucda	24
Sida Ajendaha Golaha Guud Loo Sameeyo.....	24
Wax Qabadka Golaha Guud	25
Jadwalkii Shaqo Ee Golaha Aqalka Sare (Calender).....	27
Sida Loo Fariisto Golaha Guud	28
Shuruucda La Horkeenay Golaha Aqalka Sare	29
Guddiyada Golaha Aqalka Sare	30
Qaab-Dhismeedka Guddiyada.....	31
Noocyada Guddiyada Golaha Aqalka Sare.....	31



Xubnaha Guddiyada Iyo Sida Loo Soo Xulay.....	31
Waxqabadka Guddiyada (2017)	34
4. Metelaadda Dowlad Goboledyada Iyo Shacabka	35
Xiriirka Golaha Aqalka Sare Iyo Dowlad Goboledyada	36
Xiriirka Bulshada Ee Golaha Aqalka Sare	37
5. Xiriirka Caalamiga Ah Ee Golaha	39
Aqalka Sare.....	39
Mataaneynta Golaha Aqalka Sare Iyo Baarlamaanada Caalamka	41
6. Maamulka Golaha Aqalka Sare	42
Shaqaalaha Golaha Aqalka Sare & Waajibaadkooda	44
Qaab-Dhismeedka Maamul Ee Golaha Aqalka Sare	45
Waxqabadka Maamulka Golaha Aqalka Sare.....	46
Lifaaqyo	47
Guddiga Joogtada Ah.....	47
Guddiyada Gaarka Ah	48
Guddiga Sameynta Xeerhoosaadka Golaha	48
Guddiga Sameynta Astaanta Golaha	48
Guddiga Qiimeynta Xaaladda Amni	48
Guddiga Qiimeynta Baahiyaha Shaqaale Iyo Shaqo Qorista Ee Golaha Aqalka Sare	49
Guddiga Sameynta Miisaaniyada Sanadlaha Ah Golaha Aqalka Sare	49
Guddiga Gurmada Abaaraha Ee Golaha Aqalka Sare.....	50
Guddiyada Wadajirka Ah.....	50



1. GOLAHA AQALKA SARE

“Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare sida ku xusan Dastuurka KMG (La ansixiyey 2012)”.



Arar

Allaa iska leh mahad oo dhan, Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa gole ku cusub gayiga Soomaaliyeed, waxaana si rasmi ah loo yagleelay 28kii Diseembar 2016 si waafaqsan Dastuurka Ku Meel Gaarka ah.

Golaha Aqalka Sare wuxuu billaabay in uu isu diyaariyo sidii uu u gudan lahaa xilka loo igmaday wuxuuna doortay Guddoonkiisa, unkay Guddiyada Golaha, sameystay xeer hoosaad, qaatay shaqaalaha maamul ee Golaha Aqalka Sare.

Golaha Aqalka Sare wuxuu sannad jirsaday 28 Diseembar 2017, waxaana muddadaas gudaheed u qabsoomay howlo fara badan oo ay ka mid yihiin:

- Ka qeyb qaadashada doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda.
- Gudashada xilkiisa xeer dejineed isagoo meel mariyay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka iyo Miisaaniyadda Qaranka 2018, guddoomayna Xeerka Kheyraadka Biyaha iyo Xeerka Dhisidda Guddiga la dagaallanka Musuq Maasuqa.
- La xisaabtanka Xukuumadda iyo Xafiisyada kale ee Qaranka isagoo u yeeray su'aalana weydiiyay dhowr Wasiir iyo madaxda Xafiisyada kale.
- Soo saarid qaraaro ku abbaaran arrimo markaa mudnaa in Goluhu ka hadlo go'aanna ka gaaro sida ansixinta Xubin Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib U Eegidda Dastuurka, ansixinta xubin Guddiga Xuduudaha iyo xad gudubkii lagula kacay hoyga Sen. Cabdi Xasan Cawaale Qeybdiid.
- Qaadashada kaalin odaynimo oo lagu dhex dhexaadiyay dhinacyo uu khilaaf ka dhaxeeyay sida Xukuumadda Federaalka ah iyo Dowlad Goboledyada.
- Abuuridda xiriir wanaagsan oo Goluhu la leeyahay Hey'adaha Dowladda Federalka, Dowlad Goboledyada, Beesha Caalamka, iyo Baarlamaannada Adduunka.

Waxaa intaa dheer, Guddiga Joogtada ah ee Golaha, Guddiyada Golaha, iyo Xafiisyada Maamul ee Golaha waxay soo bandhigeen wax soo saar wax ku ool ah oo ay ku dheehan tahay kowl karnimo, hufnaan iyo xil gudasho aan hagar laheyn.

Waxaan u rajeynayaa Golaha iyo Howlwadeennadiisa sannad kheyrra iyo baraare leh

Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare

Nidaamka Baarlamaaniga ah ee Soomaaliya

Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay sida ku meelgaarka ah u ansixiyeen Golaha Ansixinta Qaranka 1dii Agoosto 2012, wuxuu Dalka u dejiyay Nidaam Dowladeed oo ka duwan midkii ay ku dhaqmi jirtay Jamhuuriyadda Soomaaliya. Nidaamkaasi cusub ayaa ah nidaam ku fadhiya aragtida baahinta xukunka Dalka, kaas oo loo yaqaano Nidaamka Federaalka. Intaa waxaa dheer, Dastuurka Federaalka ee Ku meelgaarka ah wuxuu wax ka beddelay qaab-dhismeedkii Hey'adda Xeerdejinta Dalka oo inta laga ogyahay Sooyaalka Dowladnimo ee Soomaaliya aheyd Hey'ad hal gole ah laguna magacaabi jiray Golaha Shacabka. Dastuurka Federaalka ee la ansixiyay 1dii Agoosto ayaa dhisaya Hey'ad Xeerdejin ah oo ka kooban laba gole kuwaa oo kala ah: Golaha Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka oo wadajirkoodu noqonayaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, laga soo bilaabo Baarlamaankii 9aad ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Si kastaba ha ahaatee, Golaha Aqalka Sare ayaan dhismi kareen xilligaa; maadaama Dowladaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka aysan badankoodu dhisneyn, kuwaasi oo ku matelayo Goluhu Hey'adda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sida uu dhigayo Qodobka 61aad (3) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya. Si loo daboolo loona buuxiyo kaalinta Golaha Aqalka Sare ayaa Golaha Shacabka, oo xilligaa dhisnaa, u oggolaaday Dastuurku inuu qabto hawlaha iyo xilalka Golaha Aqalka Sare illaa iyo inta laga soo dhisayo Golaha Aqalka Sare sida uu xeerinayo Qod. 138(2), sidaas ayuuna Golaha Shacabku u shaqeynayay ilaa 28kii Diseembar 2016, markaas oo loo dhaariyay Xubnaha Golaha Aqalka Sare qabashada xilka senatarnimo. Kadib dhaarinta Mudaneyaasha Golaha Aqalka Sare, waxaa si rasmi ah u dhismay una hawlgalay Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Sida shaxda hoose ku cad, Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laan ka tirsan seddexda laamood ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.


Laanta Fulinta (Xukuumadda) – oo ka kooban Ra'iisul Wasaaraha iyo Golihiiisa Wasiirada – waxay qaabilsan tahay dejinta siyaasadda guud ee Dalka iyo dhaqangelinteeda, diyaarinta hindise sharciyadeedyada



iyo soo-hor-dhigiddooda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka iyo xisaab-xirkeeda iyo xiriirka caalamiga ah.

Laanta sharci-dejinta ama Baarlamaanka Federaalka waxay ka kooban tahay labo gole, Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare. Labadaan gole ayaa u xilsaaran xeer dejinta Dalka, metelaadda shacabka, iyo dowlad goboleedyada; habraac xeer dejineed wuxuu ku qeexan yahay dastuurka KMG ah.

Qaabdhismeedka Dowladda Federaalka Soomaaliya





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA AQALKA SARE

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa madaxa Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana doorta labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo wada fadhiya. Madaxweynuhu waa astaanta midnimada Qaranka, ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadii'da asaasiga ah ee Dastuurka.

Wuxuu magacaabayaa xilka wasiirka kowaad oo isaguna soo magacaaba Golihisa Wasiirada, wuxuu sidoo kale magacaaba saraakiisha sare ee Dowladda Federaalka, wuxuu furaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, wuxuu saxiixaa shuruucda uu soo ansixiyo Baarlamaanka Federaalka. Wuxuu saxiixaa heshiisyada caalamiga ah ka dib markii Golaha Wasiiradu uu meel mariyo, Baarlamaankuna uu ansixiyo. Madaxweynaha Jamhuuriyaddu waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida, wuxuu kale uu leeyahay awoodaha kale ee ku xusan Qod.90aad ee Dastuurka KMG ah.

Garsoorka Dalku wuxuu leeyahay seddex heer oo kala ah sida ku cad Dastuurka KMG ah:

- Maxkamadda Dastuuriga
- Maxkamadaha Dowladda Federaalka
- Maxkamadaha Dawladaha xubnaha ka ah Dawlada Federaalka

Maxkamadda ugu sarreysa xaga derejooyinka Maxkamadaha Federaalka waa Maxkamadda Sare ee Federaalka iyada oo Dowladaha xubinta ka ah Dowladda Federaalka iyaguna ay yeelanayaan Maxkamado Sare oo u gaar ah.

Golaha Aqalka Sare wuxuu metelaa danaha Dowlad Goboleedyada isla markaasna wuxuu ilaaliyaa hirgelinta nidaamka federaalka iyada oo la ilaalinaayo danta Qaranka sida ku cad Qod.61aad (1) (3) ee Dastuurka KMG ah. Golaha Aqalka Sare wuxuu si taxaddar leh uga baaraan degaa shuruucda uu soo meel mariyay Golaha Shacabka si looga hortago shuruuc lagu





degdegay ama aan waafaqsaneyn danta guud ee Qaranka.

Golaha Aqalka Sare oo ka kooban 54 Senatar wuxuu si isu dheellitiran u gutaa howlaha kormeerka, dib-u-eegista shuruucda iyo u kuur-gelidda Siyaasadda Guud ee Qaranka iyo arrimaha ahmiyadda gaarka ah u leh Ummadda Soomaaliyeed isaga oo adeegsanaya fadhiyada Golaha Guud iyo Guddiyada Golaha. Golaha Aqalka Sare wuxuu sida oo kale ilaaliyaa danaha dadka laga tirada badan yahay iyo kuwa baahiyaha gaarka ah qaba. Goluhu wuxuu leeyahay seddexda kaalin ee uu leeyahay gole baarlamaan: kaalin xeer-dejineed, kaalin baariseed iyo kaalin metelaad.

Kaalinta Xeer Dejineed:

- Hindise-sharciyeed kasta waa in la soo marsiiyaa Golaha Aqalka Sare si uu uga baaraandego ugana gaaro go'aan gole.
- Aqalka Sare wuxuu ansixin karaa, dib u dhigi karaa ama diidi karaa hindise-sharciyeedyada la horkeeno.
- Aqalka Sare wuxuu curin karaa hindise-sharciyeed kasta marka laga reebo miisaaniyadda sanadlaha ah ee Qaranka.

Kaalinta Baariseed

- Senatarada iyaga oo isticmaalaya aqoontooda iyo khibraddooda waxay wareysi xog raadin ah la yeelan karaan cid kasta oo muwaadin ah

iyo mas'uul kasta oo ka tirsan Dowladda Soomaaliya; si ay u helaan xog wax ku ool ah oo go'aan lagu qaadan karo.

- Senatarada waxay si qoto dheer u qiimeyn karaan arrimaha xasaasiga ah si madaxbanaan.
- Sanatarada waxay soo jeedin karaan arrin kasta oo u baahan in laga doodo ama la baaro xitaa haddii ay ka kaxsan qorsheyaasha Xukuumadda ee ku aaddan xeer-dejinta Dalka.

Kaalinta Metelaadda

- Senataradu waxay diiradda saaraan saameynta shuruucda iyo siyaasadaha Xukuumadda Dhexe ay ku yeelan karaan danaha Dowlad Goboleedyada iyo in la hubiyo in danaha Dowlad Goboleedyada la tixgeliyay.



- Xubnaha Senatarada waxay metelaan qaybaha kala gedisan ee Ummadda Somaaliyeed ee ku dhaqan Gobollada Dalka waxayna ka kooban yihiin rag iyo dumar laga soo doortay Gobolladaas.

Golaha Shacabka wuxuu ka kooban yahay 275 Xildhibaan, xubnahaas waxa ay metelayaan Bulshada Soomaaliyeed guud ahaan, wuxuuna Goluhu dib u eegis ku sameeyaa shuruucda Qaranka ee la hordhigo iyo siyaasadda guud ee Qaranka.

Habraaca Xeer Dejineed

Si wadajir ah, Senatarada iyo Xubnaha Golaha Shacabka ayaa darso Hindise-Sharciyeedyada, ayaga ooku biiranaayo fikradahooda iyo talooyinkooda xeerarka la soo hordhigo goleyaasha Baarlamaanka Federaalka. Dhab aha-antii, badi doodaha joogtada ah ee Goleyaasha iyo shaqada ugu badan ee Guddiyada waxay ku saabsan tahay ka baaraan degidda xeerarka, ka tarjumidda ra'yiga dadka ay metelaan, samaynta cilmi baaris qotodheer, la tashiyada, dhageysiga dadweynaha, doodda iyo dib-u-eegista sharciyada dowladda iyo tixgelinta faa'idooyinka arrimaha xeer-dejineed ee la hor keeno.

Hindise-sharciyeed kasta waa in uu maraa akhrin seddex jeer, sidoo kalena ay u meel mariyaan si kala madax bannaan Golaha Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka inta uusan saxiixin Maxdaxweyne si sharci dhaqangal ah looga dhigo. Habkaan wuxuu suurto gelinayaa in la hubiyo in sharciyada ay heleen tixgelin ku filan iyo in dhamaan dhinacyada uu khuseeyo ay heleen fursad ay ku mujiyaan aragtidooda.



SIDEE HINDISE-SHARCIYEED SHARCI KU NOQDAA?

Dulmar ku saabsan Habraaca Xeer Dejineed:

Meel marinta 1^{aad} ee sharci qabyo ah waxa ay ka bilaaban kartaa Aqalka Sare ama Golaha Shacabka. Haddaba, habraaca meel marinta xeerarka ee Labada Gole waa isku mid wuxuuna maraa seddex jeer akhris: -

Akhrinta 1^{aad}: Waxaa akhri-naya ciddii keentay Hindise-sharciyeedka,


Akhrinta 2^{aad} oo ah xilliga soo jeedinta warbixinta Guddiga iyo dooda Golaha.

Akhrinta 3^{aad} oo ah akhri-ta nuqulka Hindise-sharci-yeedka oo dhamaystiran oo ay ku jirto talo soo jeedintii xubnaha Aqalka Sare wax-aana akhri-naya Guddiga loo xil saaray hindise sha-rciyeedkaas waana loo cod-eynayaa.

Ugu dambeytii, nuqulka ugu dambeeya oo ay wada ansixiyaan labada gole ayaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda; si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah.



SOO GUBBINTA HINDISE SHARCIYEEDKA



ASTAANKA GOLAHA AQALKA SARE

Astaanta gole baarlamaan waxa ay ka mid tahay arrimaha gudaha ee Golahaas. Haddaba, Golaha Aqalka Sare wuxuu garowsaday baahida loo qabo in la helo astaan lagu garto Golaha maadaama uu yahay gole ku cusub qaab-dhismeedka dowladeed ee Soomaaliya kana dhashay nidaamka federaalka ah ee la qaatay, wuxuuna u saaray sameynta astaantaas guddi gaar ah oo ka koobnaa xubnaha soo socdo:

Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1	Sen. Abshir Maxamed Axmed, Guddoomiye
2	Sen. Siciido Xasan Cusmaan
3	Sen. Cabdikaafi Macalin Xasan
4	Sen. Cusmaan Axmed Macow
5	Sen. Mustafa Maxamed Qodax
6	Sen. Iftiin Xasan Iimaan
7	Sen. Muno Cumar Xasan

Guddigan wuxuu soo diyaariyay dhowr astaan oo kala duwan isaga oo hordhigay fadhiga guud ee Golaha oo ay soo xaadireen 43 xubnood, Goluhuna wuxuu ka xushay astaamahaas astaanta rasmiga ah ee hadda Aqalka lagu aqoonsado wuxuuna ku oggolaaday cod wada oggol ah. Sidaas ayaana loo sameeyay astaanta Golaha Aqalka.

2. SENATARADA

“Senatarada Golaha Aqalka Sare waa rug cadaayaal ahna waayo u joogga Dalka, taasna waxay wax badan ka tari doontaa geedi socodka dib-u-dhiska dowladnimada Soomaaliya.”

XOGTA SENATARADA

Golaha Aqalka Sare waxay ka kooban yihiin 54 Senatar iyada oo Sen. Abshir Maxamed Axmed uu ahaa Senatarkii ugu horreeyay ee la doortay 15 Oktoobar 2016.

Halkaan waxaan si kooban ugu tilmaaman xogta Sanatarada:

1. Xagga Jinsiga

41 senatar waa rag halka 13-ka kale ay yihiin haween.

2. Xagga Da'da

Xubnaha Senatarada ee da'doodu u dhaxeeyso 25 - 40 waa 11 Xubnood;

Xubnaha Senatarada ee da'doodu ay weyn tahay 40 waa 43 Xubnood.

3. Xagga Waxbarashada:

19% Dugsiga Sare

59% Heerka Koowaad

15% Master Degree,

7% PHD.

4. Xagga Khibradda

31% Xildhibaanno Hore

69% Xildhibaanno Cusub

SIDA LOO SOO DOORTO IYO SHURUUDAHA XUBINIMADA BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Mudaneyaasha Golaha Aqalka Sare waxaa sida ku xusan Qod.72 ee DKMG si toos ah u soo dooranaya Shacabka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka oo ka imaanaya 18-ka gobol ee Dalka.

Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Sida ku cad Qodobka 58^{aad} ee DKMG waxa kaa mid ah:

1. Muwaadin dhimirkiisu dhan yahay,
2. Aan ka yarayn (25) sano,
3. Aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo lagu hakin go'aan maxkmadeed shantii (5) sano ee ugu dambaysay,
4. Aqoon dugsi sare ama khibrad u dhiganta.

SENATARADA OO METELAYA SHACABKA DEEGAAN DOORASHADOODA:

Senatarrada, iyaga oo gudanaaya kaalintooda u adeegidda shacabka deegaan doorashooyinka laga soo doorto, waxay u ololeeyaan danaha Shacabka ay metelaan. Senataradu waxay soo jeediyaan arrimo badan oo ay tahay in wax laga qabto, sida u gurmashada dadka abaaraha ay saameeyeen, joojinta colaadaha, xoojinta xiriirka Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyada, waxayna u iftiimiyaan arrimahaas Golaha Guud iyo Bulshada Soomaaliyeed.



GUDDOONKA GOLAHA AQALKA SARE



Sen. Abdi Hashi Abdullahi
Guddoomiyaha Golaha




Sen. Abshir Mohamed Ahmed
**Guddomiye Ku
Xigeenka 1^{aad}**



Sen. Mowliid Hussein Guhaad
**Guddomiye Ku
Xigeenka 2^{aad}**


HABDHOWREYAASHA GOLAHA AQALKA SARE



Sen. Abdikafi Mo'alim Hassan
Habdhowraha Golaha



Sen. Fartun Abdulkadir farah
**Ku Xigeenka
Habdhowraha**



Sen. Botan Barre Samatar
Puntland




Sen. Zamzam Ibrahim Ali
Koonfur Galbeed



Sen. Abdikarim Mohamed Hassan
Gobollada Waqooyi



Sen. Abdirahman Mohamed Mohamud
Puntland



Sen. Abdirisaaq Ahmed Ali
Gobollada Waqooyi



Sen. Abdirisaaq Osman Hassan (Jurille)
Puntland



Sen. Abdisalam Hagi Mohamud Dhere
Puntland



Sen. Abdiwahid Elmi Omer
Galmudug



Sen. Abdullaahi Sheikh Ismail
Jubbaland



Sen. Osman Ahmed Ma'ow
Hirshabeelle



Sen. Deqa Hassan Hussein
Gobollada Waqooyi



Sen. Osman Mohamud Dufle
Hirshabeelle





Sen. Abdi Ahmed
Dhuhulow
Galmudug



Sen. Abdi Hassan Awale
Galmudug



Sen. Timiro Mohamed Ali
Koonfur Galbeed



Sen. Abdullaahi Abdi
Garun
Koonfur Galbeed



Sen. Ahmed Abdihafid
Mohamed
Jubbaland



Sen. Abukar Ahmed
Hashi
Galmudug



Sen. Adan Abdi Adan
Koonfur Galbeed



Sen. Ayub Ismail Yusuf
Gobollada Waqooyi



Sen. Ahmed Hashi
Maxamud
Jubbaland



Sen. Ahmed Moallim
Omer Ahmed
Jubbaland



Sen. Bilal Idris Abdilaahi
Gobollada Waqooyi



Sen. Fatima Hassan Adan
Jubbaland



Sen. Farhan Ali Hussein
Puntland



Sen. Hussein Ali Haji
Abdalla
Koonfur Galbeed



Sen. Ilyas Ali Hassan
Koonfur Galbeed



Sen. Hodan Mohamud
Osman
Puntland



Sen. Iftiin Hassan Iman
Jubbaland



Sen. Mohamed Amin
Sheikh Osman
Hirshabeelle



Sen. Hussein Sheikh
Mohamud
Koonfur Galbeed



Sen. Mahdi Dahir Sheikh
Nur
Puntland



Sen. Mohamed Osman
Farah
Hirshabeelle



Sen. Jawahir Ahmed
Elmi
Galmudug



Sen. Muse Sudi Yalahow
Hirshabeelle



Sen. Muno Omar Hassan
Gobollada Waqooyi





Sen. Shukri Aden
Mohamed
Puntland



Sen. Mohamed Hussein
Rage
Hirshabeelle



Sen. Omar Abdirashid Ali
Sharmarke
Puntland



Sen. Mohamud Ahmed
Mohamud
Puntland



Sen. Yusuf Gelle Ugas
Galmudug



Sen. Hassan Farah Hujale
Jubaland



Sen. Zamzam Dahir
Mohamud
Galmudug



Sen. Saed Abdi Hussein
Gobollada Waqooyi



Sen. Mustaf Mohamed
Qodah
Gobollada Waqooyi



Sen. Noro Farah Jama
Gobollada Waqooyi



Sen. Saido Hassan
Osman
Puntland



Sen. Muhudin Sh. Ali
Jama
Gobollada Waqooyi



Sen. Naimo Ibrahim
Yusuf
Hirshabelle

DEEGAAN DOORASHOYINKA XUBNAHA AQALKA SARE

Aqalka Sare waxaa uu ka kooban yahay 54 kursi oo ka kala yimid Dowlad Goboleedyada:

DEEGAAN DOORASHADA	TIRADA SENATARADA	BOQOLEYDA
Puntland	11	20%
Gobollada Waqooyi	11	20%
Galmudug	8	15%
Hirshabeelle	8	15%
Koonfur Galbeed	8	15%
Jubbaland	8	15%
Tirada Guud	54	100%

Ma jiraan wax kuraas ah oo bannaan, dhammaan xubnaha Golaha Aqalka Sare waa ay dhan yihiin.

3. WAXQABADKA GOLAHA AQALKA SARE

“Xubnaha Aqalka Sare waxay kaalin muhiim ah ka qaataan sharci-dejinta Dalka Soomaaliya. Marka la joogo Fadhiga Guud ee Golaha, waxay curiyaan ama dib-u-eegis ku sameeyaan hindise-sharciyeedyada. Marka la joogo Guddiyadana, waxay si qoto dheer daraasad ugu sameeyaan hindise-sharciyeedyada iyaga oo kaashanaya aqoontooda iyo khibradooda.”



FADHIGA GUUD EE GOLAHA

Fadhiga Guud ee Golaha Aqalka Sare waa meesha lagu falanqeeyo loogana doodo arrimaha qaranka, arrimaha khuseeyo Dowlad Goboleedyadda iyo shuruucda Federaalka. Dhammaan Hindise sharciyeedyada soo maray Golaha Shacabka waa in ay soo maraan Golaha Aqalka Sare ka hor inta aan loo gudbinin Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka. Aqalku waxuu awood u leeyahay in uu ka qaado hindise sharciyeed kasta seddex tallaabo: in uu sidiisa ku ansixiyo, in uu diido, iyo in uu wax ka beddel ku sameeyo hindise sharciyeedkaas.

Habraaca Meel Marinta Sharuucda

Hindise-sharciyeedyada la hor keeno Golaha Aqalka Sare waxay maraan seddex marxaladood ka hor inta uusan go'aan ka gaarin Golaha, waxayna kala yihiin: -



1

AKHRINTA ^{1AAD}

2

AKHRINTA ^{2AAD}

3

AKHRINTA ^{3AAD}

Sida Ajendaha Golaha Guud Loo Sameeyo

Guddiga Joogtada ah ee Goluhu wuxuu diyaariyaa ajendaha fadhiyada soo socda ee Golaha Guud, waxaana loo qeybinayaa Xubanaha Golaha ugu yaraan 12 saacadood ka hor fadhiga golaha guud.

Ajendaha kulan walba waxaa lagu ansixinayaa cod gacan taag ah, haddii aysan ugu yaraan 5 xubnood bilowga fadhiga u gudbin Guddoomiyaha Golaha soo jeedin qoraal ah oo wax lagaga bedbelaayo ajendaha iyagoo soo jeedinayo arrin deg deg ah, soo jeedintuna waa in ay ku saxiixan yihiin xubnaha taageeraya, ama 5 xubnood ayaa soo jeedineyso in wax laga beddelo ama wax lagu daro ajendaha isla fadhigaas hadii ay u codeeyaan (50% + 1) ee tirada guud ee xubnaha fadhiya kulanka.



WAX QABADKA GOLAHA GUUD

1. Waxa uu ka qeybqaatay Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
2. Waxa uu ansixiyay Hindise-Sharciyeedka Isgaarsiinta iyo Miisaaniyadda 2018.
3. Wuxuu ansixiyay qaraarada soo socdo: -
 - a. Qaraarka Doorashada Guddoonka Golaha Aqalka Sare
 - b. Qaraarka Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
 - c. Qaraarka Ansixinta Habdhowrayaasha Golaha Aqalka Sare
 - d. Qaraarka Dhismaha Guddiga Gurmada Abaaraha ee Golaha Aqalka Sare
 - e. Qaraarka Ansixinta Miisaaniyadda Golaha Aqalka Sare ee 2017
 - f. Qaraarka Ansixinta Xeerhoosaadka Golaha Aqalka Sare
 - g. Qaraarka Dhismaha Guddiyada Golaha Aqalka Sare
 - h. Qaraarka Ansixinta Xubinnimada M.ne. Sakariye Saciid Cusmaan ee Guddiga Madaxbannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka
 - i. Qaraarka Dhisidda Guddiga Xallinta Khilaafka Laanta Fulinta ee Dowladda Federaalka iyo Laamaha Fulinta Dowladdaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka
 - j. Qaraarka Ansixinta Xubinnimada Qareen. Muumino Sheekh Cumar ee Guddiga Madaxbannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
 - k. Qaraarka Gaboodfallada Ciidamada Amnigu u geysanayaan Muwaadiniinta iyo Senataraada
4. Waxa uu la xisabtan la yeeshay hay'ado ka tirsan Laanta Fulinta ee Dowladda Federaalka oo kala ah: -

- a. Wasiirka Arrimaha Diinta iyo Owqaafta ee XFS
 - b. Wasiirka Gaadiidka iyo Duulista Hawada ee XFS
 - c. Wasiirka Arrimaha Dibedda ee XFS
 - d. Wasiirka Qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga ah ee XFS
 - e. Guddiga Madaxbannaan ee Dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
 - f. Guddiga Madaxbannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka
 - g. Guddiga Madaxbannaan ee Dooroshooyinka Qaranka
 - h. Guddiga Dib u Heshiisiinta Qaranka
 - i. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.
5. Waxaa uu dhisay Ururka Haweenka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
 6. Waxa uu heshiis is afgarad ah Golaha Aqalka Sare la galay Golaha Wakiilada ee Jabuuti.
 7. Waxa uu xiriir wanaagsan la sameeyay Dowlad Goboleedyada isaga oo kulamo la qaatay Hey'adaha Dowlad Goboleedyada oo kala ah:-
 - a. Guddiga Joogtada ah Golaha Aqalka Sare oo xarunta Golaha ku martiqaaday Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Xeerdejinta Dowlad Goboleedyada
 - b. Booqashada Golaha Aqalka Sare ee Dowlad Goboleedka Puntland iyo Jubbaland.
 - c. Booqasha Madaxweyneyaasha Dowlad Goboleedyada ee Golaha Aqalka Sare
 8. Wuxuu baroordiiq duco ah u sameeyay dadkii ku geeriyooday qaraxii Zoobe 14 Oktoobar 2017.
 9. Wuxuu maamuus gaar ah u sameeyay Sen. Cusmaan Maxamuud Dufle oo la guddoonsiiyay Abaalmarin Caalami ah.

Lr.	TIRO KOOB	TIRADA GUUD
1.	Kulamada Golaha Guud	51 Kulan
2.	Saacadaha Shaqo	153 Saacadood



JADWALKII SHAQO EE GOLAHA AQALKA SARE (Calendar)

JANUARY

M	T	W	T	F	S	S
						1
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30	31					

FEBRUARY

M	T	W	T	F	S	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28				

MARCH

M	T	W	T	F	S	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

APRIL

M	T	W	T	F	S	S
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

MAY

M	T	W	T	F	S	S
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

JUNE

M	T	W	T	F	S	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

JULY

M	T	W	T	F	S	S
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
31						

AUGUST

M	T	W	T	F	S	S
1	2	3	4	5	6	
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30	31			

SEPTEMBER

M	T	W	T	F	S	S
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

OCTOBER

M	T	W	T	F	S	S
					1	
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30	31					

NOVEMBER

M	T	W	T	F	S	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

DECEMBER

M	T	W	T	F	S	S
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
31						



SIDA LOOFARIISTO GOLAHA GUUD



Sida ka muuqato jaantuska, habka uu u fariisto Golaha Aqalka Sare waa sidatan: qeybta sare ee soo jeedka waxaa fariista Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare iyo Ku Xigeennadiisa, Guddoomiyaha Golaha ayaa kursiga bartanka ah fariista halka midigtiisa uu fariisto Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad, dhanka bidixna waxaa fariista Guddoomiye ku-Xigeenka Labaad. Masraxa qeybtiisa hoose waxaa fariista habdhowreyaasha iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare.

Qeybta dhexe waxaa fariista Xubnaha Senatarada Golaha Aqalka Sare halka bidixda iyo midigtana ay fariistaan kuna howlgalaan warbaahinta, safka ugu dambeeya waxaa fariista hawlwadeennada Golaha Aqalka Sare.

SHURUUCDA LA HORKEENAY GOLAHA AQALKA SARE

Muddadii sannadka aheyd ee uu shaqeynayay Golaha Aqalka Sare waxaa la horkeenay hindise sharciyeedyada soo socdo wuxuuna uga gutay waajibkiisa sida soo socoto:

Lr.	Hindisaha	Cidda Keentay	Lr.	Tar. Lasoo Gudbiyay	Akhrinta 1aad	Akhrinta 2aad	Akhrinta 3aad	Faahfaahin
1.	Sharciga Isgaarsiinta	Wasaaradda Isgaarsiinta	01	12.8.17	19.8.17	20.8.17	21.8.17	La Ansixiyay
2.	Sharciga Kheyraadka Biyaha	Wasaaradda Biyaha & Tamarta	02	21.11.17	24.03.18			Horyaalla Guddiga Khayraadka
3.	Sharciga Dhismaha Guddiga La Dagaallanka Musuq Maasuqa	Wasaaradda Caddaaladda	03	28.11.17	23.04.18			Horyaalla Guddiga Garsoorka

SHURUURCDA KU SOO WAJAHAN GOLAHA AQALKA SARE

Lr	Magaca Sharciga	Hay'adda Keeneyso
1.	Hindise sharciyeedka Patroolka	Wasaaradda Batroolka
2.	Maamulka Maaliyadda (PFM)	Wasaaradda Maaliyadda
3.	La-dagaallanka Argagaxisada	Wasaaradda Amniga Gudaha
4.	Hindise-sharciyeedka Waxbarashada Soomaaliya	Wasaaradda Waxbarashada
5.	Hindise-sharciyeedka Xakamaynta Hubka wax dila	Wasaaradda Amniga Gudaha
6.	Hindise-sharciyeedka Istaatistikida Soomaaliya	Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
7.	Hindise sharciyeedka Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka	Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada
8.	Dib-u-eegista Sharciga Xaq-siinta Ciidamada Qalabka Sida	Golaha Shacabka
9.	Dib u eegista sharciga xaqsiinta Siyaasiyiinta	Golaha Shacabka
10.	Shuruuc kale oo la filaayo in la soo gudbiyo sida Sharciga Doorashooyinka Qaranka	Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka

GUDDIYADA GOLAHA AQALKA SARE

Guddiyada Baarlamaaniga ah waa halbowlaha socodsiiya howlaha xeer dejinta ee Baarlamaannada, waana halka looga baaraandego laguna turxaan bixiyo dhammaan howlaha uu qabto gole baarlamaan.

Marka la joogo Guddiyada, Senataradu waxay daraasad qoto dheer ku sameeyaan Hindise-sharciyeedyada loo soo gudbiyay ama uu curiyay Golaha, sameeyaan baaritaanno iyo daraasado gaar ah waxayna dib u eegis ku sameeyaan Miisaaniyadda Qaranka.

Marka dib-u-eegis lagu sameeynayo hindise-sharciyeedyada, xubnaha Guddiga waxay dhageystaan dadweynaha iyo cid allaale ciddii uu khuseeyo Hindise Sharciyeedka, markaa ka dib Guddigu wuxuu ugu codeeyaa qodob qodob.

Guddiyadu, iyaga oo ku sameynaya baaritaanno arrimaha gaar ah, waxay gacan ka geystaan ifinta baahiyaha bulsho, mid dhaqaale iyo mid siyaasadeed. Guddiyada ayaa sidoo kale siiyo Xubnaha Senatarada fursado gaar ah oo ay ku dhageystaan warbixinno gaar ah oo ka imaanaya Dadweynaha, Saraakiisha Dowladda, Wakiilo ururada kala gedisan, iyo khubarro iyaga oo uga warrama Guddiga arrinta ay markaas Guddigu gacanta ku hayaan. Sidoo kale, waxaa u furan muwaadiniinta iyo hay'adaha kala duwan in ay horyimaadaan Guddiyada Golaha si ay warbixin gaar ah u siiyaan.

Iyada oo la adeegsanayo awoodda gaar ah ee Goluhu u leeyahay ilaalinta danaha Dowlad Goboleedyada iyo dadka aan metelaadda laheyn ama laga tiro badan yahay, Guddiyada Goluhu waxay dhageystaan dadka aan fursad u helin in codkooda la maqlo, waxaana la siiyaa waqti badan oo ay kaga doodaan sharciyada iyo siyaasadaha saameynta ku leh.

QAAB-DHISMEDKA GUDDIYADA

Guud ahaan, Xubnaha Guddiyada waxay u dhaxeeyaan 4 ilaa 6 Senatar. Guddoomiyaha Guddi walbo waxaa soo dooranaya xubnaha Guddiga, wuxuuna mas'uul ka yahay maamulka iyo guddoominta shirarka Guddiga, ilaalinta nidaamka, kormeerka miisaaniyadda guddiga, isaga kaliya ayaana ku hadli kara magaca Guddiga.

NOOCYADA GUDDIYADA GOLAHA AQALKA SARE

Golaha Aqalka Sare waxaa uu leeyahay 3 nooc oo Guddiyo ah kuwaas oo kala ah:

1. Guddiyo Joogto ah: Waa guddiyada u jira sida joogtada ah una xilsaaran arrimaha kala duwan ee la xiriira siyaasadda iyo sharciyada, sida: Difaaca, Garsoorka, Arrimaha Gudaha, Dibadda, Ganacsiga, Kheyraadka IWM.
2. Guddiyo Gaar ah: waa guddiyo si ku-meel gaar ah uu Goluhu u dhiso si ay sameeyaan daraasad ku saabsan mowduuc gaar ah ama qabanaya howl gaar ah, jirayana waqti xaddidan kadibna ay idlaanayso shaqadooda.
3. Guddiyo isku-dhafan: (Gaar ama Joogto) guddiyada waxaa ku midaysan Xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka kuwaas oo u xilsaaran arrimaha sida wadajirka ah ay u leeyihiin Labada Gole.

XUBNAHA GUDDIYADA IYO SIDA LOO SOO XULAY

Golaha Aqalka Sare wuxuu leeyahay toban guddi hoosaad oo joogto ah iyo hal urur haween baarlamaan. Mid kastaa oo ka mid ah Guddiyadan wuxuu u qeybsan yahay arrimo gaar ah; si howlaha Golaha ay ugu socdaan si habsami leh.

Marka laga reebo Guddiga Joogtada ah iyo Ururka Haweenka Baarlamaanka, Guddi kasta

wuxuu ka kooban yahay afar ilaa lix xubnood oo laga soo kala doortay shanta Dowlad Goboleed iyo Gobollada Waqooyi, waxayna ugu qeybsan yihiin Guddiyada sidatan:



I. Guddiga La Socodka Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (Aqalka Sare)

1. Sen Cabdi Xasan Cawaale “Qeybdiid” – Guddoomiye
2. Sen. Xuseen Sheekh Maxamuud – Xoghaye
3. Sen. Iftiin Xasan Imaan “Baasto” – Xubin
4. Sen. Cabdikariim Maxamed Xasan – Xubin
5. Sen. Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil “Fartaag”-Xubin

II. Guddiga Xeer Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda iyo Daryeelka Senatarada

1. Sen. Xasan Faarax Xujaale – Guddoomiye
2. Sen. Axmed Cabdixafiid Maxamed “Bulsho” – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Cabdulaahi Cabdi Garuun – Xubin
4. Sen. Bilaal Idiris Cabdulaahi – Xubin
5. Sen. Mahdi Daahir Sh. Nuur – Xubin

III. Guddiga Garsoorka, Arimaha Diinta & Awqaafta, Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Caruurta

1. Sen. Zamzam Ibraahim Cali – Guddoomiye
2. Sen. Faadumo Xasan Aadan “Geriyoo” – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Cismaan Axmed Macow – Xoghayn
4. Sen. Cumar Cabdirashiid Cali Sharma’arke – Xubin
5. Sen. Abuukar Axmed Xaashi – Xubin

IV. Guddiga Arimaha Gudaha, Dib u Heshiisiinta iyo Xiriirka Dawlad Gobleedyada.

1. Sen. Muxyidiin Sh. Cali Jaamac – Guddoomiye
2. Sen. Jawaahir Axmed Cilmi – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Timiro Maxamed Cali – Xoghayn
4. Sen. Maxamed Xuseen Raage – Xubin
5. Sen. Saciido Xasan Xuseen – Xubin
6. Sen. Cabdiwaaxid Cilmi Joongeex – Xubin

V. Guddiga Difaaca iyo Amniga

1. Sen. Maxamed Amiin Sh. Cismaan – Guddoomiye
2. Sen. Xuseen Cali Xaaji Cabdalla – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Axmed Xaashi Maxamuud – Xubin
4. Sen. Cabdirisaaq Axmed Cali – Xubin



VI. Guddiga Arrimaha Dibedda Qorsheynta, maalgashiga iyo iskaashiga Caalamiga ah:

1. Sen. Cabdirisaaq Cismaan Xasan “Juriile” – Guddoomiye
2. Sen. Maxamed Cismaan Faarax “Dhagajuun” – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Siciid Cabdi Xuseen – Xoghayn
4. Sen. Ayuub Ibraahim Yusuf – Xubin
5. Sen. Cabdisalaam Xaaji Maxamed – Xubin
6. Sen. Shugri Aadan Maxamed

VII. Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada, Arimaha Bani’aadanimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka.

1. Sen. Axmed Macalin Cumar Nadiir – Guddoomiye
2. Sen. Adan Cali Adan – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Muno Xasan Cumar – Xoghayn
4. Sen. Zamzam Daahir Maxamuud – Xubin
5. Sen. Cusmaan Maxamuud Maxamed – Xubin
6. Sen. Nuura Faarax Jaamac – Xubin

VIII. Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabayaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka

1. Sen. Ilyas Cali Xasan – Guddoomiye
2. Sen. Maxamuud Axmed Maxamuud “Mashruuc”. – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf – Xoghayn
4. Sen. Mustaf Maxamed Qodax – Xubin
5. Sen. Yuusuf Geele Ugaas – Xubin

IX. Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska

1. Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow – Guddoomiye
2. Sen. Deejo Xasan Xuseen – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Hodan Maxamuud Cusmaan – Xoghayn
4. Sen. Bootaan Bare Samatar – Xubin
5. Sen. Farxaan Cali Xuseen – Xubin
6. Sen. Muuse Suudi Yalaxow – Xubin



Ugu dambeyntii, Guddiga Joogtada ee Golaha Aqalka Sare wuxuu ka kooban yahay Guddoonka Golaha, Labada Habdhowre, iyo Guddoomiyeyaasha Guddiyada kor ku xusan, halka Urur Haweenka Baarlamaanka uu ka kooban yahay 13-ka xubnood ee dumarka ah:

1. Sen. Shugri Aadan Maxamed - Guddoomiye
2. Sen. Zamzam Ibraahim Cali – Guddoomiye Ku Xigeen
3. Sen. Deeqo Xasan Xuseen – Guddoomiye Ku Xigeen
4. Sen. Fartuun Cabdiqaadir Faarax Karaama – Khaznaji
5. Sen. Zamzam Daahir Maxamuud – Xoghayn
6. Sen. Timiro Maxamed Cali – Xubin
7. 7Sen. Faadumo Xasan Aadan “Geriyó” – Xubin
8. Sen. Jawaahir Axmed Cilmi – Xubin
9. Sen. Saciido Xasan Xuseen – Xubin
10. Sen. Muno Xasan Cumar – Xubin
11. Sen. Nuura Faarax Jaamac – Xubin
12. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf – Xubin
13. Sen. Hodan Maxamuud Cusmaan – Xubin

WAXQABADKA GUDDIYADA (2017)

Waxqabadka	Tirada Guud
Kulamada	221
Warbixinno	43
Saacadaha Shaqo	680
Dadka Hor Yimid	76
Hindise Sharciyeedyada	1
Xaqiiqo Raadin (Saacadaha)	Ma jirin
Daraasado Gaar ah	Ma jirin



4. METELAADDA DOWLD GOBOLEDYADA IYO SHACABKA

“Xubin kasta oo ka mid ah Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu xil gaar ahi ka saaran yahay in uu metelo danaha Dowlad Goboleedyada iyo in uu ilaaliyo nidaamka Federaalka, kuna shaqeeyo dareen iskaashi federaalnimo.”

Xiriirka Golaha Aqalka Sare iyo Dowlad Goboleedyada

Golaha Aqalka Sare waxaa loo igmaday metelaadda danaha Dowlad Goboleedyada; si taas loo xaqiijiyo, Goluhu waxa uu kulamo iyo wada tashiyo joogta ah la yeeshay Dowlad Goboleedyada xubinta ka ah Dowladda Federaalka ah.

Guddiga joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare waxa uu xarunta Golaha ku martiqaaday Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Xeerdejinta ee Dowlad Goboleedyada taariikhdu markii ay aheyd 23 Agoosto 2017 si la isaga wareysto xaaladda xeer dajineed ee Maamul Goboleedyada iyo sidii ay si wadajir ah uga wada shaqeyn lahaayeen soo saarista shuruuc Qaranka iyo Dowlad Goboleedyadaba waxtar u leh.

Iyadoo la xoojinaayo xiriirka ka dhaxeeya maamul Goboleedyada Dalka ka jira iyo Golaha Aqalka Sare, waxaa Guddoonka iyo xubno ka tirsan Aqalka ay booqasho ku tageen Dowlad Goboleedka Puntland taariikhdu markii ay aheyd 24 Oktoobar 2017.

Si loo dardar geliyo wada shaqeynta iyo isku xirnaanta Dowlad Goboleedyada iyo Golaha Aqalka Sare, waxaa xarunta Golaha booqasho ku yimid Madaxweynayaasha Dowlad Goboleedyada xubinta ka ah Dowladda Federaalka ah taariikhdu markii ay aheyd 6 Nofeembar 2017 iyaga oo Golaha hortiisa ka jeediyay khudbado ay uga hadlaayeen howlaha, waxqabadka Dowlad goboleedyadooda iyo wada shaqeynta ka dhaxeysa Golaha Aqalka Sare iyo Dowlad Goboleedyada maadaama uu Golaha Aqalka Sare uu iyoqasho ku tagay Dowlad Goboleedka Puntland taariikhdu markii ay aheyd 8 Nofeembar 2017

Sidoo kale, Golaha Aqalka Sare wuxuu booqasho ku tagay Dowlad Goboleedka Jubbaland taariikhdu markii ay aheyd 8 Nofeembar 2017

Ugu dambeyntii, Guddiga Joogtada ah ee Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa qado sharaf u sameeyay Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Xeer Dejinta ee Dowlad Goboleedyada xubinta ka ah Dowladda Federaalka ah 24kii Diseembar 2017 si la isaga xog wareysto xaaladda guud ee Dowlad Goboleedka, arimaha xeer dejineed, iyo adkeynta wada shaqeynta Dowlad Goboleedyada iyo Golaha Aqalka Sare.



Kulamada Golaha iyo Hey'adaha Dowlad Goboledyada	Taariikh
Guddiga Joogtada ah Golaha Aqalka Sare oo xarunta Golaha ku martiqaaday Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Xeerdejinta Dowlad Goboledyada	23 Agoosto 2017
Booqashada Golaha Aqalka Sare ee Dowlad Goboledka Puntland	24 Oktoobar 2017
Booqasha Madaxweyneyaasha Dowlad Goboledyada ee Golaha Aqalka Sare	6 Nofeembar 2017
Booqashada Golaha Aqalka Sare ee Dowlad Goboledka Jubbaland	8 Nofeembar 2017
Qado Sharaf Guddiga Joogtada ee Golaha u sameeyay Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Xeerdejinta Dowlad Goboledyada	24 Diseembar 2017

Xiriirka Bulshada ee Golaha Aqalka Sare

Golaha Aqalka Sare wuxuu si joogto ah uga jawaabaa dhibaatooyinka la soo gudboonaada Bulshada Soomaaliyeed isla markaasna wuxuuna u ololeeyaa horumarinta adeegyada bulshada iyo sarreynta sharciga.

Golaha Aqalka Sare waxa uu sameeyay abaartii 2017kii Guddi Gurmada Abaaro si Goluhu kaalmo uga geysto marxaladaas taganeyd wuxuuna ka koobanaa Shan xubnood oo kala ah:-

1. Sen. Maxamuud Axmed Maxamuud (Mashruuc),
2. Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf,
3. Sen. Samsam Ibraahim Cali,
4. Sen. Muna Cumar Xasan,
5. Sen. Iftin Xasan limaana (Basto).

Guddigan wuxuu uruuriyay kuna wareejiyay Guddiga Qaran ee gurmada abaaraha lacag dhan \$33,700 oo ay iska jareen Senatarada Golaha Aqalka Sare.

Golaha Aqalka Sare wuxuu garowsaday in uu fursadaha shaqo ee Aqalka looga faa'ideeyo dhalinyarada aqoonyahannada ah isagoo u saaray arrintaas Guddi Shaqaaleysiin oo ka koobnaa shan xubnood oo kala ah:

1. Sen. Maxamed Xusen Raage
2. Sen. Xusen Sheekh Maxamuud
3. Sen. Fadumo Xasan Aadan Geriyo
4. Sen. Muxuyadiin Sheekh Cali Jaamac
5. Sen. Yuusuf Geele Ugaas



Guddiga isaga oo ka ambaqaadaya howshii loo igmaday ee ahayd in ay ka soo talo bixiyaan qaabka shaqaale qorista ee Aqalka Sare, waxay soo jeediyeen qodobada soo socda:

1. In la raaco sharciga shaqaalaha Rayidka ah numberkiisa yahay “11” ee Baydhabo 2006 guud ahaan gaar ahaan qeybtiisa 3aad qodobkiisa 5aad ee qeexaya “Shuruudaha laga doonayo qafka la shaqaaleysiinayo iyo qeybta 5aad qodobka 23aad ee qeexaya waajibbaadka”.
2. In loo kala qeybiyo shaqaalaha heerar kale duwan sida uu qabo qodobka 4aad ee qybta 2aad sida A, F, B, C, X, iyo D.
3. In la raaco nidaam daahfuran oo si siman oo caddaalad ah ay uga wada qeybgeli karaan imtixaanka dhammaan dadka shaqo doonka ah ayadoon loo eegin jinsi, reer, gobol, naafo, iyo waxii kale ee kala sooc keeni kara.
4. Liiska gaaban (short list) waxaa sameynaya Guddiga Shaqaaleysiinta ee Golaha ayagoo eegaya jago waliba takhasuskeeda iyo sharuudaheeda. Waxaa marka 1aad la sameynayaa liis dheer oo imtixaanka qoraalka ah galaya (ugu yaraan 20, ugu badnaan 30 qof jogo kasta).
5. Codsiyada taariikh nololeedka (CV) iyo nuqulada shahaadooyinka gaar ahaan shaqaalaha takhasuska looga baahan yahay waxaa lagu soo dirayaa email u gaar ah oo ay maamulayaan guddiga shaqaaleysiinta iyo guddoonka golaha. Qaf waliba oo shaqo Doon ah wuxuu ku soo dirayaa dukumintiyadiisa emailkaas qof gacanta ku keenaya majiri karo marka laga reebo in uu u soo dhiiban karo senaterada mid ka mid ah. Shaqaalaha hoose waxaa magacyadooda soo gudbin karta xubnaha golaha.
6. Waxaa shaqooyinka aqoonta u baahan lagu soo xayeysinayaa Websitayada, wargeysyada, idaacadaha iyo in lagu dhejiyo derbiyada goobaha dad weynaha isugu yimaadan.
7. Ciddii ku guuleysata waxaa la marinayaa jeegareyn in aanayn ku lug lahayn kooxaha argagixisada (security check).

Goluhuna wuxuu u hirgeliyay qodobbadaas sida ay u soo jeediyeen Guddiga kor ku xusan.

Sidoo kale, Golaha Aqalka Sare isagoo ka turjumaayo kaalintiisa metelaada bulshada waxa uu fursad siiyay dhallinyaro Soomaaliyeed oo ka soo qalinjebiyeen jaamacadaha si ay khibrad uga helaan hannaanka uu u shaqeeyaan Baarlamaannada. Goluhu isaga kaashaday Hay’adda SSG (Strengthening Somalia’s Governance) wuxuu toban dhallinyaro ah oo isugu jiray wiilal iyo gabdho siiyay fursad ay uga howlgalaan Golaha Aqalka Sare; si ay uga helaan khibrad shaqo.

Arrimaha kor ku xusan waa qeyb yar oo ka mid ah howlaha la taaban karo ee uu Goluhu ku xoojinaayo adeegga iyo xiriirka kala dhaxeeya Bulshada qeybaheeda kala duwan gaar ahaan dhallinyarada iyo haweenka oo gundhig u ah jiritaanka Bulshada. Goluhu wuxuu sanadaha soo socdo ku talo jiraa in uu kordhiyo barnaamijyada waxtar-ka toos-ka ah u leh bulshada.



5. Xiriirka Caalamiga ah ee Golaha Aqalka Sare

“Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waxa ay ku dhisan tahay nidaam baarlamaani ah, Goluhuna waxa uu metelaa Bulshada Soomaaliyeed iyo danaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxa uuna xariir la leeyahay Ururada Baarlamaannada Adduunka iyo kuwa Goboleedba.”

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu metelaa Shacabka Soomaaliyeed iyo danahooda wuxuuna ka mid yahay hey'adaha ugu sarreeya Dowlada ayna ka go'do talada Dalka. Sidaas darteed, waxaa Golaha booqashooyin kala duwan ku yimid madax heer caalami ah, ururo caalami ah, iyo wakiillo dowlado si ay wax ula qabtaan Golaha iyo Bulshada Soomaaliyeed. Guddoonka Aqalka sare ayaa kulumo la yeeshay qeybaha hoos ku xusan iyaga oo ka wada hadlay sidii ay u yeelan lahaayeen wada shaqeyn buuxdo loona caawin lahaa Golaha maadaama uu yahay hay'ad cusub oo dhawaan la unkay isla markaasna Goluhu uu ka faa'ideysto taageeradooda iyo xiriirka aqoon kororsi ee Hay'adahaas:

1. UNBOSS,
2. UNDP,
3. EU,
4. Safiirka ingriiska u fadhiya Dalka
5. Safiirka Turkiga u fadhiya Dalka
6. Safiirka Switzerland
7. Safiirka Sweden
8. Jaamacadda Carabta
9. Ra'iisal Wasaare Ku Xigeenka Dalka Turkiga
10. SSG – US -AID
11. Oslo Center
12. iyo xiriiro kale aan toos ahayn

Sidoo kale, Guddoonka iyo Xubnaha Golaha Aqalka Sare waxay shirar iyo siminaarro uga qeybgaleen dalal ay ka mid yihiin Kenya iyo Uganda.

MATAANEYNTA GOLAHA AQALKA SARE IYO BAARLAMAANADA CAALAMKA

Muddada Sanadka ah ee Golaha Aqalka ee Soomaaliya shaqeynayay, Goluhu wuxuu xiriir wada sameeyeen Goleyaal Baarlamaani oo heer caalami ah iyadoo ujeedadu tahay abuuridda xiriir iskaashi, wadashqeyn. Xiriiradaasi uu sameeyay Guddoonka Golaha Aqalka Sare waxaa ka miradhalay qaar halka kuwa kalena ay weli socdaan wadhadalladooda.

Guddoonka Golaha Aqalka Sare waxay si gaar ah xoogga u saarayaan Goleyaasha Baarlamaani ee ka dhisan kuna shaqeyya Wadamada ku dhaqma Nidaamka Federaalka si la isu dhaafsado khibradaha iyo Xeeldheernimada loo leeyahay ku dhaqanka iyo ku shaqeynta Nidaamka Federaalka marka ay noqoto Goleyaasha Baarlamaaniga ah.

Illaa hadda, Goluhu wuxuu Heshiis Is afgarad ah oo ku saabsan Mataaneynta Goleyaasha Baarlamaan ee Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti la galay Golaha Wakiilada ee Qaranka Jabuuti kaasoo fududeynaya Xiriir iskaashi oo dhinacyo badan oo ay yeeshaan labada baarlamaan iyagoo si gaar ah isaga kaashan doonaa dhinacyada isdhaafsiga xogaha la xiriira shuruucda nidaamineysa amniga, dhaqaalaha iyo arrimaha kale ee Gobolka Geeska Afrika muhiimka u ah, isdhaafsiga khibradaha, isgarabsiga xilliyada laga wada qeybgalayo shirarka caalamiga ah iyo joogteynta booqashada labada dhinac si loo adkeeyo xiriirka labada gole.

Guddoonka Golaha wuxuu qorsheynayaa horumarinta xiriirka Golaha Aqalka Sare uu la yeelan karo Baarlamaanada kale ee Caalamka gaar ahaan kuwa aynu bahwadaagta nahay ee Dowladdaha Islaamka, kuwa Carabta iyo kuwa kale ee ku dhaqma Nidaamka Federaalka si loo unko xiriir diblomaasiyadeed oo Baarlamaani ah oo fududeynaya wada falgelidda Golaha iyo Baarlamaanada Adduunka, waxaana hubaal ah in xiriiradaasi ay wax badan ka tari doonaan adkeynta iyo xoojinta ku dhaqanka Nidaamka Federaalka oo ah xilka dastuuriga ah ee sida gaarka ah u saaran Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaaniga Federaalka Soomaaliya islamarkaana ay Senatarada ku kaalmeyn doonto gudasha xilkooda dastuuriga ee ah ka shaqeynta Danaha Qaranka iyo Ilaalinta Danaha Dowladdaha Xubinta ka ah Dowladda Federaalka oo ay ku metalaan kuraasta ay ku fadhiyaan ee Golaha.

6. Maamulka Golaha Aqalka Sare



Oraahda Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare

Shaqaalaha Maamul ee Golaha Aqalka Sare waxa ay halbowle u yihiin habsami u socodka howlaha kala geddisan ee Golaha, waxa ayna gacan farsamo oo buuxda siiyaan Guddoonka Golaha, Guddiga Joogtada ah, Guddiyada Golaha, iyo Senatarada guud ahaan.

Shaqaalaha Golaha Aqalka Sare waxa ay xubno muhiim ah ka yihiin shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda waxa ayna ku maqaam iyo la xuquuq yihiin shaqaalaha dhiggooda ah ee laamaha kale ee Dowladda Federaalka.

Xafiisyada Maamul ee Golaha Aqalka Sare iyaga oo kaashanaya Guddoonka Golaha waxay soo bandhigeen wax qabad waxtar leh, waxaana ku dhiirrigelinayaa waaxyaha Golaha in ay joogteeyaan howshii wanaagsaneyd ee ay qabteen ugana jawaabeen baahida Golaha.

Xafiisyada maamul ee haatan shaqeeya waxa ay muujiyeen dedaal dheeri ah iyaga oo ku shaqeeyay duruufo shaqaale yari iyo dhaqaale xumo una dhabar adeegay gudashada xilka loo igmaday.

Golaha Aqalka Sare waxaa ka go'an in uu sare u qaado xirfadda iyo aqoonta shaqaalahiisa, wuxuuna ayna had iyo jeer ka shaqeyn doonaa sidii ay u heli lahaayeen tababarro iyo fursado aqoon kororsi.

Golaha Aqalka Sare wuxuu ku bogaadinayaa shaqaalaha Golaha howl karnimada, hufnaanta, iyo wax qabadka ay la yimaadeen, wuxuuna u rajeynayaan hore u socod iyo guul sanadaha soo socdo.

Guul iyo gobonnimo,

Cali Maxamed Jaamac

Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare



SHAQAALAHA GOLAHA AQALKA SARE & WAAJIBAADKOODA

Golaha Aqalka Sare wuxuu 25 Febraayo 2017 u saaray qaadashada shaqaalaha Golaha guddi gaar ah oo soo qiimeeya baahida shaqaale ee Golaha kana soo talo bixiya habraaca shaqaaleysiinta shaqaalaha Golaha Aqalka Sare.

Guddigan wuxuu 14 Maajo 2017 u soo gudbiyay Golaha warbixin faahfaahsan uuna ansixiyay Golaha. Si waafaqsan warbixinta Guddigan, baahida shaqaale ee Golaha waxaa lagu soo koobay 61 ruux waxayna kala yihiin sida hoos ku xusan:

1. Xoghayaha Guud
2. Ku Xigeenka Xoghayaha Guud
3. Agaasimaha Waaxda Maamulka, Maaliyadda, iyo Shaqaalaha
4. Agaasimaha Waaxda Shuruucda, Cilmi Baarista & Xusuus Dhowrka
5. Agaasimaha Waaxda Guddiyada, Adeegga Guddoonka iyo Golaha, iyo Hab-maamuuska
6. Agaasimaha Waaxda Xiriirka Dowlad Goboleedyada
7. Agaasimaha Waaxda Qorsheynta & ICT
8. Toddobo Sharci Qoreyaal
9. 16 Howlwadeenno
10. 12 Xogheynto
11. 19 Shaqaale Hoose

Golaha Aqalka Sare wuxuu ilaa hadda shaqaaleysiiyey guud ahaan 26 xubnood oo kala ah: Xoghayaha Guud, Ku Xigeenkiisa, shan Agaasime Waaxeed, afar Farsamoyaqaan, iyo 15 Shaqaale Nadaafadeed.

Shaqaalaha Maamul ee Golaha waxaa la marsiiyey tartan furan oo markii hore loo xilsaaray Hay'adda UNDP kana qaaday tartameyaasha kusoo baxay liiska gaaban (shortlist) imtixaan qoraal ah taariikhdu markii ay aheyd 16/07/2017. Kadib markii Goluhu arkay natiijada imtixaanka qoraalka ahaa ee Hey'adda UNDP kuna qanci waayay natiijadaas, wuxuu go'aansaday Goluhu in la qaado mar labaad imtixaan qoraal ah iyada oo Goluhu u xilsaaray qaadista imtixaankaas Jaamacadda Umadda Soomaaliya oo ay kala saxiixdeen heshiis.


Jaamacaddu waxay qaaday imtixaan qoraal ah taariikhdu markii ay aheyd 10/09/2017, waxayna Jaamacaddu 12/10/2017 ka qaaday waydiin oraaheed shaqo (job interview) tartamayaashii ku soo guuleysatay imtixaanka qoraalka. Nidaamkaas hufan ayuuna Goluhu ku shaqaaleysiiyay Xoghayaha Guud, Ku Xigeenkiisa, Agaasimaha Waaxda Maamulka, Maaliyadda, iyo Shaqaalaha, Agaasimaha Waaxda Shuruucda, Cilmi Baarista & Xusuus Dhowrka, Agaasimaha Waaxda Guddiyada, Adeega Guddoonka iyo Golaha, iyo Hab-maamuuska, Agaasimaha Waaxda Xiriirka Dowlad Goboleedyada, iyo Agaasimaha Waaxda Qorsheynta & ICT.



Shaqaalaha Maamul ee Golaha Aqalka Sare waxa ay si rasmi ah u howlgaleen Bishii Oktoobar 2017. Waajibaadka loo igmaday xafiisyada maamul ee Golaha waxaa ka mid ah:

1. Isu duwidda arrimaha maaliyadda Aqalka.
2. Maareynta Arrimaha Shaqaalaha Aqalka.
3. Qorsheynta iyo qabashada howl maalmeedka maamul ee Golaha.
4. Ku gacan siinta Senatarada xil gudashadooda iyaga oo u fidinaya adeegyada farsamo ee aan laga maarmin.
5. Isku xirka Golaha Aqalka Sare iyo Hay'adaha kale ee Dowladda
6. Isku dubbaridka xiriirada Golaha iyo Hay'adaha taageera Baarlamaanka.
7. Diyaarinta warbixinnada iyo howlaha kale ee laga codsado.
8. Casriyeynta habka uu u shaqeeyo Golaha iyo hirgelinta nidaam casri oo ka jawaabaya baahida Golaha.

QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE GOLAHA AQALKA SARE



WAXQABADKA MAAMULKA GOLAHA AQALKA SARE

Iyada oo la kaashanaayo hagidda wanaagsan ee Guddoonka Golaha Aqalka Sare, Xafiisyada Maamul oo uu hoggaaminaayo Xafiiska Xoghayaha Guud waxaa u qabsoomay howlaha soo socdo:

1. Maareynta arrimaha maaliyadda Aqalka.
2. Qalabeynta dhammaan Xafiisyada.
3. U helidda shaqaale Guddiyada Golaha iyada oo ay gacan ka geysatay Hay'adda SSG.
4. Dejinta nidaamka kaydinta xogta Golaha iyo hirgelintiisa.
5. Dejinta habraacyada shaqo ee lagama marmaanka u ah habsami u socodka Howlaha Golaha.
6. Agaasimidda fadhiyada, kulamada iyo munaasabadaha Golaha.
7. Dejinta iyo hirgelinta nidaamka ID – Card-ka Aqalka.
8. Diiwaangelinta shaqaalaha Aqalka iyo ku wareejinta mushaaraadkooda khasnadda Dowladda.
9. Abuuridda xiriiro wanaagsan oo lala yeeshay hey'adaha kale ee Dowladda, Hay'adaha taageera Baarlamaanka, iyo Ururada kale ee daneeya arrimaha Baarlamaanka iyada oo lala kaashanaayo Guddoonka iyo Senatarada Golaha.
10. Diyaarinta dhammaan dukumiintiyada iyo warbixinnada uu u baahan yahay Golaha.
11. Dhowridda wakhtiga shaqada (8:00 a.m. – 4:00 p.m.) iyada oo dhammaan shaqaalaha Golaha ay saxiixaan gelid iyo bixidba
12. Xoojinta xiriirka Golaha iyo Bulshada Soomaaliyeed iyada oo la adeegsanaayo hababka casriga ah ee lagu wadaago xogta sida website ama akoonno social media ka furan.
13. U helid la talin sharci Guddoonka iyo Guddiyada Golaha hadba baahida taagan.



Lifaaqyo

Lifaaq B:

Guddiga Joogtada ah

Lr.	Magaca	Xilka
1.	Senator Cabdi Xashi Cabdullaahi	Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
2.	Senator Abshir Maxamed Axmed	Guddoomiye ku-xigeenka 1aad
3.	Senator Mowliid Xuseen Guhaad	Guddoomiye ku-xigeenka 2aad
4.	Senator Cabdikaafi Macalim Xassan	Hab-dhowraha Golaha
5.	Senator Fartuun Cabdullaahi Faarax Karaama	Ku Xigeenka Hab-dhowraha Golaha
6.	Senator Xassan Faarah Xujaale	Guddoomiyaha Guddiga xeer hoosaadka, anshaxa, xasaanadda, & daryeelka Senatarada
7.	Senator Samsam Ibraahim Cali	Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Arimaha Diinta & Awqafta, Xuquuqul Insaanka, Haweenka Iyo Caruurta
8.	Senator Muxiyadian Sh Cali Jaamac	Guddoomiyaha Guddiga Arimaha Gudaha, Dibu Heshiisiintaiyo Xiriirka Dawlad Goboleedyada.
9.	Senator Maxamed Amiin Sheekh Cusman	Guddoomiyaha Guddiga Difaaca iyo Amniga
10.	Senator Cabdirisaaq Cusman Xassan (Jurille)	Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Dibedda Qorsheynta, maalgashiga iyo iskaashiga Caalamiga ah
11.	Senator Axmed Macalim Cumar Axmed (Nadir)	Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada, Arimaha Bani'aadanimada, Warfaafinta iyo Dhaqanka.
12.	Senator Ilyaas Cali Xassan	Guddoomiyaha Guddiga Kheyraadka Qaranka, Kaabayaasha Dhaqaalaha & Gaadiidka.
13.	Senator Cabdi Axmed Dhuxulow	Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska.
14.	Senator Cabdi Xassan Cawaale (Qaybdiid)	Guddoomiyaha Guddiga la socodka Dib ueegista iyo Hirgelinta Dastuurka.



GUDDIYADA GAARKA AH

GUDDIGA SAMEYNTA XEERHOOSAADKA GOLAHA

Guddiga Gaarka ah ee loo xilsaaray soo diyaarinta Xeerhoosaadka ayaa horkeenay Golaha Xeerhoosaad ka kooban toban (10) Cutub iyo 95 Qodob, dood iyo ka baraandegid dheer kadib, Golaha ayaa ansixiyay Xeerhoosaadkiisa kaasi oo ka caawin doona xil gudashadooda Dastuuriga ah.

GUDDIGA SAMEYNTA XEERHOOSAADKA GOLAHA

Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1.	Sen. Xasan Faarax Xujaale, Guddoomiye
2.	Sen. Cabdirisaaq Cusmaan Xasan (Jurille)
3.	Sen. Cabdiwaaxid Cilmi Cumar (Goonjeex)
4.	Sen. Shukri Aadan Maxamed
5.	Sen. Deeqa Xasan Xuseen
6.	Sen. Maxamed Amiin Sheekh Cusmaan
7.	Sen. Cabdikariim Maxamed Xasan

Guddiga Sameynta Astaanta Golaha

Golaha ayaa u xilsaaray guddi gaar ah oo ka kooban toddobo (7) xubnood oo soo diyaariya Astaanta uu yeelanayo Golaha Aqalka Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuuna warbixintiisa u soo gudbiyay golaha isagoo soo hordhigay fadhiga guud ee Golaha Aqalka Sare Astaanta uu soo diyaariyay.

GUDDIGA SAMEYNTA ASTAANTA GOLAHA

Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1.	Sen. Abshir Maxamed Axmed, Guddoomiye
2.	Sen. Siciido Xasan Cusmaan
3.	Sen. Cabdikaafi Macalin Xasan
4.	Sen. Cusmaan Axmed Macow
5.	Sen. Mustafa Maxamed Qodax
6.	Sen. Iftiin Xasan limaan
7.	Sen. Muno Cumar Xasan

Guddiga Qiimeynta Xaaladda Amni

Iyadoo la qadarinayo xaalada amni ee Dalku ku jiro, Golaha wuxuu sameeyay guddi gaar ah oo ka kooban todoba (7) Xubnood oo soo qiimeeya xaalada amni ee Xarunta goluhu ku shaqeyn doono si looga baaraandego dulduleelada amni ee jiri kara loona hubiyo amniga Senatarada iyo Xarunta Golaha Aqalka Sare. Guddiga ayaa uga soo warbixiyay qiimeyntiisa ku aadan xaalada amniga ee Xarunta Golaha Aqalka Sare isagoo soojeediyay qaadida tallaabooyin lagu adkeynayo amniga Senatarada iyo Xarunta Golaha.



GUDDIGA QIIMEYNTA XAALADDA AMNI	
Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1.	Sen. Cabdi Xasan Cawaale (Qeybdiid), Guddoomiye
2.	Sen. Axmed Xaashi Maxamuud
3.	Sen. Cabdirisaaq Axmed Cali
4.	Sen. Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag)
5.	Sen. Jawaahir Axmed Cilmi
6.	Sen. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole)
7.	Sen. Muuse Suudi Yalaxow

Guddiga Qiimeynta Baahiyaha Shaqaale iyo Shaqo Qorista ee Golaha Aqalka Sare

Golaha Aqalka Sare ayaa sameeyay Guddi gaar ah oo ka kooban toddobo (7) xubnood oo soo baaraandegga baahiyaha shaqaale ee goluhu qabo iyo habka loo marayo shaqo qorista shaqaalaha goluhu qaadanayo. Kadib markuu soo qiimeeyay baahiyaha shaqaale ee goluhu qabo, Guddigu wuxuu warbixintiisa u soo gudbiyay fadhiga guud ee Golaha si looga doodo kadibna loo ansixiyo.

GUDDIGA QIIMEYNTA BAAHIYAHA SHAQAALE IYO SHAQO QORISTA EE GOLAHA AQALKA SARE	
Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1.	Sen. Maxamed Xuseen Raage, Guddoomiye
2.	Sen. Xuseen Sheekh Maxamuud
3.	Sen. Faadumo Xasan Aadan Geriyo
4.	Sen. Muxuyidiin Sheekh Cali Jaamac
5.	Sen. Yuusuf Geele Ugaas
6.	Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf
7.	Sen. Maxamuud Axmed Maxamuud (Mashruuc)

Guddiga Sameynta Miisaaniyada Sanadlaha ah Golaha Aqalka Sare

Si loo socodsiiyo howl maalmeedka Golaha Aqalka Sare, waxaa lagama maarmaan noqotay in Goluhu dhiso guddi gaar ah oo ka soo talobixiya soona diyaariya miisaaniyadda Sanadlaha ah ee Goluhu ku howlgalayo sanadka 2017. Guddiga la dhisay ayaa ka koobnaa toddobo (7) xubnood, wuxuuna warbixintiisa u soo gudbiyay fadhiga guud ee golaha kaasoo ka dooday kadibna ansixiyay Miisaaniyadda uu soo diyaariyay guddigaasi.



GUDDIGA SAMEYNTA MIISAANIYADA SANADLAHA AH GOLAHA AQALKA SARE

Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1.	Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow, Guddoomiye
2.	Sen. Farxaan Cali Xuseen
3.	Sen. Ilyaa Cali Xasan
4.	Sen. Ayuub Ismaaciil Yuusuf
5.	Sen. Nuura Jaamac Faarax
6.	Sen. Axmed Macalin Cumar (Nadiir)
7.	Sen. Hodan Maxamed Cusmaan

Guddiga Gurmada Abaaraha ee Golaha Aqalka Sare

Sida la wada ogsoonyahay, dabayaaqadii Sanadkii 2016-ka iyo billowgii Sanadkii 2017 waxaa Dalka ka dhacay abaarada lixaad leh kuwaa oo saameeyay noloshu shacabka Soomaaliyeed. Golaha isagoo gudanaya waajibkiisa muwaadinnimo ee ah u gargaarida shacabka ku waxyeelobay abaarahaasi; wuxuu sameeyay guddi gaar oo ka kooban shan(5) xubnood kuwaa oo golaha dhexdiisa ka billaaba olole gurmada oo dhaqaale looga aruurinayo mudaneyaasha Golaha Aqalka Sare si loogu gargaaro dadkii waxyeeladu gaarsiisay abaarta. Guddiga ayaa ka soo aruuriyay mudaneyaasha Golaha dhaqaale gaaraya \$ 33,700.00. Golaha Aqalka Sare ayaa ku wareejiyay Guddiga Qaranka ee Gurmada Abaaraha Dhaqaalahaasi laga soo aruuriyay Mudaneyaasha Golaha.

GUDDIGA GURMADKA ABAARAHA EE GOLAHA AQALKA SARE

Lr.	Magacyada Xubnaha Guddiga
1.	Sen. Iftiin Xasan Iimaan (Baasto), Guddoomiye
2.	Sen. Naciimo Ibraahim Yuusuf
3.	Sen. Maxamed Cusmaan Faarax Dhagajuun
4.	Sen. Muna Cumar Xasan
5.	Sen. Maxamuud Axmed Maxamuud (Mashruuc)

Guddiyada Wadajirka ah

Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu leeyahay hal guddi wadajir oo uu la wadaago Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya kaas oo ah Guddiga la socodka dib u eegista iyo hirgelinta Dastuurka laguna dhisay si waafaqsan qodobka 133 (2) ee Dastuurka KMG ah.



Lifaaqa T: Wixii La faafiyay ama La Daabacay

Waxii La faafiyey ama La daabacay

Xeer-hoosaadka Aqalka
Sare

Nuqulka 1aad

11/April/2017





KALA SOCO AMA KALA SOO XIRIIR
GOLAHA AQALKA SARE EE B.F.S.

 @AqalkaSare or @SenateSom

 @AqalkaSare or @SenateSom

 info@Senate.gov.so or sg@senate.gov.so

 Senate.gov.so